



City of Omaha  
1819 Farnam St  
Omaha, NE 68183  
cityofomaha.org  
402-444-5220

Degane Qaaliga ah:

Shirkadda K2 Construction ayaa loo xilsaaray qandaraaska hagaajinta isgoyska 33rd iyo Hamilton. Intaa waxaa dheer, Magaalada Omaha waxay la shaqaysay JEO Consulting Group si ay u noqoto wakiilka goobta isla markaana u maamusho hawlaha dhismaha mashruucan.

Horumarrada dhismaha waxaa ka mid ah rakibidda wareeg (roundabout) ee isgoyska, dhismaha waddooyinka dadka lugeeya (sidewalks), iyo hagaajinta nidaamka bullaacadaha roobka. Horumarradan waxaa loogu talagalay in lagu wanaajiyo socodka gaadiidka, badbaadada, iyo isku xirka dadka lugaynaya, iyadoo sidoo kale la yareynayo ciriiriga gaadiidka ee aagga.

Sida laga yaabo inaad horey u aragtay, hawlaha ka hor dhismaha, oo ay ku jiraan rarista adeegyada (utility relocations), ayaa hadda ka socda aagga. Rarista adeegyada waxay u baahan tahay in isgoyska la xiro si shaqadaas loo dhammeeyo ka hor inta aan dhismaha bilaaban. Xiritaan buuxa oo isgoyska ah ayaa loo qorsheeyay Arbacada, Maarso 25, 2026.

Dhismaha mashruuca, oo ay ku jirto xiritaanka buuxa ee isgoyska, waxaa la filayaa inuu bilowdo usbuuca Maarso 30, 2026, waxaana la rajeynayaa in la dhammeeyo bisha Sebtembar 2026. Sawir muujinaya aagga xiritaanka ayaa lagu daray macluumaad ahaan (fiiri dhinaca dambe). Fadlan ogow jadwalkani wuu isbedeli karaa sababo lama filaan ah ama dib u dhac cimilada ah awgood.

Isgoyska waxaa loo xirayaa gaadiidka inta uu mashruucu socdo, iyadoo la raacayo nidaamka hagidda gaadiidka ee lagu muujiyay sawirka. Waddooyinka gelitaanka guryaha ee aan ku jirin xadka dhismaha mar walba waa la heli doonaa. Deganayaasha leh waddooyin ku jira xadka dhismaha waxay yeelan doonaan xaddidaadyo ku meel gaar ah oo gelitaanka ah, kuwaas oo si gaar ah lala wadaagi doono inta dhismaha socdo.

Si loo yareeyo dib u dhaca shaqada, fadlan ha shidin qalabka waraabinta cawska (sprinklers) ee biyaha ku buufin kara aagga dhismaha, ama kala shaqee qandaraaslaha iyo kooxda mashruuca sidii loo xakameyn lahaa tuubooyinka waraabinta. Sidoo kale, fadlan ha dhaqaajin ama ha faragelin xayndaabyada, caqabadaha, ama qalabka digniinta. Qalabkani waa muhiim si loo muujiyo meelaha halista ah. Fadlan sidoo kale wargeli dadka kale (oo ay ku jiraan carruurta) ee ku sugan goobtaada shaqadan soo socota iyo baahida loo qabo in taxaddar la muujiyo marka la joogo meelaha dhismaha.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca waxaa laga heli karaa bogga “Keep Omaha Moving” ee Magaalada Omaha:

<http://www.keepomahamoving.com/projects>.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad degdeg ah inta dhismaha socdo, fadlan la xiriir:


**Tim Fasel**  
JEO Construction Manager  
316.304.7925  
[tfasel@jeo.com](mailto:tfasel@jeo.com)

**Jeff Webert**  
K2 Construction Project Manager  
402.890.2299  
[jwebert@k2construction.biz](mailto:jwebert@k2construction.biz)

## Khariidadda Xiritaanka Dhismaha ee 33rd & Hamilton



Xiritaanka waddo sabab la xiriirta dhismo



Waddadu way xiran tahay / gelitaan kaliya dadka deegaanka